


### Platon (428-348 BC.)

Platon waxa uu ahaa faylosoof. Magaalada Aten layidhaa waxa uu kula kulmay faylosoofka caanka ah ee la yiraa, Sokrates oo ardaygiisii noqday. Platon waxa uu isku dayey in uu jawaab u helo waxa uu dadku yahay. Waxa uu aaminsanaa in dadku u qaybsan yahay jidh iyo ruux, waxa uu yiri jirka iyo ruuxdu waxy ka kala tirsanyihii laba caalam oo kala duwan. Jirku wuxu ka tirsanyahay aduunka aan dareemi karro, taasoo macnaheedu yahay, waata aan arki karro maqlina karro. Marka aan dhimano, jidhku wuu baaba,aa, ruuxdu wxay ka tirsantahay aduunka abadiga ah ee aynaan dareemayn, laakiin aan ku fikirro uun. Wuxa uu ugu yeedhay aduunkan, aduunkii fakarka. Platon waxa uu aaminsanaa, shakhsiyadeenu inay tahay qayb ka mida ruuxdeena, marka uu qof dhintana, ruuxaddu waxay ku sii noolaanaysaa dunida fakarka.



Illustrasjon: Pixabay

Ereyga faylosoof waa erey Griig ah oo ka kooban ereyada filos, oo micna heedu yahay jacayl ama saaxiib, iyo sofia, oo micnaheedu yahay xikmad. Faylosoof macnaheedu waa jacaylka xikmadda, faylosoofkuna xikmadda wuxu u arkaa saaxiibkii.

Platon wuxu qeexay ruuxaddu ina ay tahay sidii farda fuul laba faras wada, Fardafuulka fardaha wadaa waa

sawirka caqligeena, waana inuu ilaaliyaa in farduhu ay jijo wada aadaan. Fardaha midi waa madow. Waa sawirka waxa aad ugu jeceshahay, sida lacag badan, awood badan, ma fiicna in faraska madow oo kali ihi go,aamiyo jihada la tagayo. Faraska labaad waa caddaan. Waa sawirka rabitaankeena, oo in isna uu go,aamiyo kaligii jihada la tagayaa ma wanaagsana. Farda fuulku waa in uu u adkaystaa labada farasba, oo ah jacaylkeena iyo rabitaankeena. Platon waxa uu aaminsanaa qofka dhexdhedaadka ah, adkeysi iyo xikmadlihi inuu qof wanaagsan yahay.

Waqtigii uu Platon noolaa dadka inta badani waxa ay aaminsanaayeen in ruuxda qofka xorta ah iyo ta addoonku ay kala duwanyihiin, waxay kaloo aaminsanaayeen in ta ragga iyo ta haweenku kala duwanyihiin. Waxay aaminsanaayeen in ruuxdda raggu ka horumarsantahay ta haweenka. Ta qofka xorta ihina ay ka horumarsantahay ta addoonka. Platon lamuu qabin in ruuxadda dadku kala duwantahay, wuxu aaminsanaa in dadka oo dhan loola dhaqmo si isku mid ah.

Sawire Rafael Santi «Dugsigii Athen». Sidan ayuu ahaa dugsigii uu Platon aasaasay, dhexda waxad ku aragtaa Platon iyo Aristoteles.



Illustasjon: Pixabay

Su,aal

1. Labadee qaybood ayuu qofku ka kaoobanyahay ayuu aminsanaa Platon?
2. Labadee aduun ama caalam ayey ka tirsanyihii daka ruuxdooda iyo jifhkoodu
3. Maxaa tilmaamaya qofka wanaagsan sidii uu sheegay Platon?

### Ku qor Erayada shaxda

SLAVE VILJE FORNUFT KROPP IDÉVERDEN SJEL MAKTE VISDOM MÅTEHOLD

FORSVINNE KUSK EVIG MENNESKE

<b>MORSMÅL (SOMALI)</b>	<b>NORSK</b>